



Hanaanka Qacfaan qaadashada

Marka la soo gaabiyo waa [Wareejinta Manfaca Elegtarooniga ee Loogu Talagalay Cudurka Safmarka](#), ee barnaamijka P-EBT ga waa barnaamij gargaar COVID-19 ah oo ay dowladda federaalka ay bixiso oo la soo mariyo [Xeerka Kajawaabista Fayraska ee Barnaamijka Mudnaanta Qoyska \(Families First\)](#) iyo [Xeerka Qorshaha Samatabbixinta Mareykanka ee 2021](#). Isticmaalka kaararka P-EBT ga, barnaamijku waxa uu kuu fidinayaa gargaar Barnaamijka Qadada Dugsiga Qaranka iyo qoysaska u qalma si ay u beddelaan cuntooyinka dugsiga ee ay ardayda seegeen inta lagu jiray muddadii xanuunka safmarka ee COVID-19 oo iskuulka uu xirnaa darteed.

Racfcannada waxaa la qabanayaa inta lagu jiro bisha 10ka Oktoobar, 2022 - 20 Janaayo, 2023
Muddada racfaanka P-EBT ga waxay furan tahay oo keliya 10ka bisha Oktoobar, 2022, illaa 20ka bisha Janaayo, 2023 waxayna dambooli doontaa maaraynta P-EBT laga bilaabo bisha Maarso 2020 illaa 31 bisha Luulyo, 2022. Habka codsiga racfaanku wax yar ayuu u kala duwan yahay iyadoo ay ku xiran tahay wakhtiga manfacyada P-EBT ga ee qofku uu racfaanka qaadana. Sii akhri si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah.

Racfaan ka Qaadashada P-EBT ga ee Wareegga 4aad (Agoosto 2021– Maajo 2022)

Wareegga 4aad ee P-EBT waxay dadka u fidisay kaalmo dhaqaale si ay u beddelaan cunnada dugsiga ee ardaydu seegtay intii dugsga uu xirnaa cudurka safka ee COVID-19 ee iskuulkoodu xirnaa darteed. Wareegga 4aad ee P-EBT ga waxaa loogu talagalay oo loo diyaariyay carruurta iskuulka laga siiyo cuntada bilaashka ah ama qiimo ahana la dhimay ee mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Barnaamijka Qadada Dugsiga Qaranka, codsiga dakhliga ama caddayn toos ah
- Dhigashada dugsi Bixinta U-qalmitaanka Bulshada,
- Dhigashada dugsi ku shaqeeya sida waafaqsan Xeerka 2 ama 3, **iy**
- *dugsigoodu la xiray ama la dhimay saacadaha / a dhiganayay 5 maalmood oo xiraan isku xig ah.*

Carruurta xaqa u leh waxaa la siiyay \$7.10 oo ah maalin kasta oo ah maalin cudur daar la siiyay ee maqnaanshaha la xiriira COVID ee laga soo sheegay dugsigooda.



Sida Racfaanka Loo Gudbiyo ee Waeegga 4aad ee P-EBT ga

Haddii aad aaminsan tahay in ilmahaagu u qalmo Waeegga 4aad ee P-EBT, laakiin aanu helin manfacyada maqnaanshaha COVID, racfaanka waxaa laga xaraysan karaa Barta Xariirka Waalidka (Parent Portal) ee P-EBT ga OneDhs.Tn.gov/parent raac talaabooyinkan:

1. Si loo habeeyo Racfaanka P-EBT ga, waalidiintu waxay u baahan doonaan inay hubiyaan in ilmahooda/carruurtooda isku xiraan akoonkooda ay ku leeyihiin P-EBT ga ee Barta Waalidka (Parent Portal). Haddii aanad hore u samayn akoon P-EBT ga ee Parent Portal, koonto ka samayso adiga oo booqanaya: OneDhs.Tn.Gov dooro P-EBT Parent Portal oo gal Barta Waalidka oo isku xir adiga adiga oo halkaas ku soo gudbiya ama ka bilaabo hanaanka Racfaanqaadashada.
2. Marka aad gasho Barta Waalidka ee P-EBT ga, dooro batoonka **Racfaan (Appeal)** ee qaybta sare ku qoran.
3. Dooro maalmaga manfacyada uu seegay oo soo geli dukumeenti taageeraya ee ay tahay in lagu lifaaqo kiiska ilmaha.

Ogsoonaw: Codsii racfaan oo gooni ah ayaa looga baahan yahay ilmo kasta - ma soo gudbin kartid hal racfaan oo carruurta oo dhan ah.

Wreegga 4aad ee P-EBT ga Su'aalaha Inta badan La Isweydiyo ee Racfaanka ku Saabsan

- **Maxaan sameeyaa haddii aanan arkin magaca ilmahaaga si aan u doorto inaab sii gudbiyo Racfaanka?**
Haddii aadan ku arkin ilmahaaga hoos-u-dhigga (dropdown) markaad soo gudbinayso Racfaanka P-EBT ga, wac lambarka **Caawinaada (Help Desk) 833-419-3210** si racfaan aad u soo gudbiso. Wakiilka miiska caawinta ee kaa qabta ayaa qori doona macluumaadka lagama maarmaanka ah si ilmahaaga loogu daro nidaamka. Waxaad heli doontaa iimeel wicitaanka ka dib si aad u xaqiijiso in macluumaadka lagaa qoray inta lagu guda jiro wicitaanku uu ahaa mid sax ah oo aad hesho ogeysiin marka la xaqiijiyo u-qalmitaanka ilmahaaga oo TDHS ay go'aan ka gaarto kiiskaaga.
- **Nidaamku ma kala duwan yahay iyadoo ay ku xiran nooca iskuulka ee ilmahaagu dhigto?**
Haa, habka warbixinta way kala duwan tahay oo wax yar ayay ku kala duwan tahay oo waxay ku xiran tahay haddii ilmahaagu dhigto dugsii dadweyne ama mid gaar loo leeyahay. Labada habba waxaa lagu sameeyaa Barta Waalidka (Parent Portal ee P-EBT ga oo ah <https://OneDhs.Tn.gov/parent>. Haddii ilmahaagu dhigto dugsiga dadweynaha, waxaad awoodi doontaa inaad codsato Racfaan taariikho gaar ah oo la xiriira maqnaanshaha COVID-19 awgeed. Haddii ilmahaagu dhigto dugsii gaarka ah, waxaad awoodi doontaa inaad codsato Racfaan marka la eego tirada maalmaha bil kasta ilmahaagu iskuulka uga maqnaa COVID-19 dartii.



- **Ka waran haddii aan maalmaha racfaanka qaadanayo ilmahaaga loo qoray inuu Joogay?**

Haddii aad soo gudbinayso racfaan P-EBT ga maalmo dugsigu u qoray ilmahaagu inuu joogo, waxaa si **xoogan laguugu dhiirigeliyay** inaad ku lifaaqdo/oo aad barta soo geliso dukumeenti sheegaya in ilmahaagu ka maqnaa maalmahaas COVID-19 dartiis. Dukumeenti qaab kasta ah (doc., Excel, pdf, jpeg, png, iwm.) waa la aqbali doonaa. Tusaalooyinka dukumeentiyada waxaa ka mid ah: qoraalo dhakhtar qoray, xiriirka iimayl ee dugsiga isdhaafsateen ama macalinka aad isdhaafsateen.

- **Goorma ayaan heli doonaa manfacyadaya barnaamijka Racfaanada P-EBT ga?**

Si loo hubiyo heerka iyo taariikhda qaybinta manfacyada P-EBT ga, waalidiintu waxay isticmaali karaan Barta Waalidka ee P-EBT ga markay booqdaan: OneDhs.Tn.Gov/Waalid ama iyaga soo wacaya khadka tooska ah taleefoonka P-EBT ga ee **1-833-496-0661**. TDHS waxay qorshaynaysaa in ay soo saarto manfacyada la codsado iyada oo loo marayo habka Racfaanka, iyada oo loo marayo hab marba mid la soo saarayo.

- **Maxaan sameeyaa marka la ii sheego inaan u baahanahay inaan diro dukumeenti dheeraad ah?**

Haddii aad hesho iimeel la igu waydiinayo dukumeenti ka dib markaan soo gudbiso codsigaaga Racfaanka P-EBT ga, waxaad heli doontaa *5 maalmood oo ah maalmaha shaqada* laga bilaabo taariikhda iimeel la soo diro si loo gudbiyo dukumeenti Warqad kasta oo la diro **ka dib** maalinta shanaad lama tixgelin doono inta lagu jiro dib u eegista kiiskaaga racfaanka.

Waxaad u baahnaan doontaa inaad u soo gudbiso dukumeenti dheeri ah PEBTAppeals.round4.dhs@tn.gov oo ay la socdaan xogtan soo socota:

- Aqoonsiga Lambarka Dacwadda Racfaanka (Appeal Case Number ID)
- Magaca Ardayga
- Warqadaha Lifaaqa

- **Intee in le'eg ayaan heli doonaa iyadoo lagu saleynayo oggolaanshaha racfaankayga?**

Qadarka racfaanka P-EBT ga waxay ku xiran tahay tirada arday kasta *maqnaansho* la xiran tahay COVID-19 ee lagu soo gudbiyay habka Racfaanka oo la ansixiyay.

Qadarka lagu soo shubayo iskuul kasta way ku kala duwanaan karaa ardayba ardayga kale, xataa qoyska dhexdiisa. Si aad u aragto qaddarka lacag ee ilmahaagu uu heli karo, booqo P-EBT ga ee Barta Waalidka (Parent Portal) oo ah <https://Onedhs.Tn.gov/Parent>. Waxaad ka hubin kartaa kaarkaaga P-EBT ga inta ku



jirta www.connectebt.com ama adiga oo waca lambarka dhabarka kaarkaaga P-EBT ga ku qoran.

- **Sideen ku oggaan karaa in codsigayga P-EBT ga la aqbalay ama la diiday?**

Waxaad heli doontaa iimeel ku ogeysiya oo kuu sheegaya in codsigaaga la ansixiyay ama la diiday. Haddii lagu oggolaado, waxaad sidoo kale awoodi doontaa inaad ka aragto cadadka shaashadda "Mancayaddayda" ("My benefits") markaad gasho Barta Waalidka (Parent Portal) ee P-EBT ga,

Racfaan ka Qaadashada P-EBT ga ee Wareegga 3aad (Oktoobar 2020– Juun 2021)

Wareegga 3aad ee gargaarka dhaqaale ee loo bixiyay cudurka Safmarka ee P-EBT ga oo loogu badalo cunnooyinka iskuulka ee la seegay bilawgii Oktoobar 2020 sababo laxiriira iskuullada oo laxirayay darteed, barashada qatka, ama jadwalka iskudhafka ah ee iskuulka. Carruur u qalma waxaa soo soo diray kaarka P-EBT ga. Sidii hore si ka duwan ee wareegyadii hore ee P-EBT ga, kaararkan waxaa dib loogu soo shubi doonaa manfacyada P-EBT ga bil kasta illaa iyo inta USDA ay sii wado barnaamijka. Wreegga 3aad ee P-EBT ga ayaa loo furay ardayda:

- Hel cuntooyin bilaash ah ama qiimo jaban adiga oo u soo maraya Barnaamijka Qadada ee Dugsiga Qaranka (National School Lunch Program) (ama) Ka qaybgal Dugsiga Bixinta U-qalmitaanka Bulshada.
- Seegay cuntada laga bixiyo iskuulka sababbo la xiriira iskuulku uu xirnaa darteed ama wuxuu ku shaqeynayay hoos u dhac ku yimid ugu yaraan 5 maalmood oo isku xigta sannad dugsiyeedka 2020-2021 darteed.

Caddada arday kasta uu helay way ku kala duwanaan tahay iyadoo lagu saleynayo jadwalkooda waxbarasho. Laga bilaabo bishii Maarso 2021, Kaarar cusub ee P-EBT ga ayaa boostada loogu soo diri doonaa ardayda u qalma sida ku cad macluumaadka ay bixiyeen Dugsiyada Tennessee. Si loo hubiyo in dhammaan carruurta xaq u leh ay helaan manfacyadda nafaqeynta, TDHS waxa ay kordhinaysaa muddada racfaanka ee waalidiinta aaminsan in ilmahoodu u qalmo Wareegga 3aad ee P-EBT ga.



Sida Loo soo Gudbiyo Racfaan P-EBT ga ee Waegga 3aad

Waalidiinta aan soo gudbin racfaanka wakhtiga loogu talagay in la soo gudbiyo manfacada oo ah bisha (Oktoobar 2020-Juun 2021) oo ay rumaysan in ilmahoodu u qalmo waegga 3aad ee P-EBT ga, laakiin aan helin manfacyo, waxay ku xerayn karaan racfaan mid ka mid ah siyaabaha soo socda:

1. Qaab Online Mid ka mid ah Barta Macmiilka ee DHS ee [OneDhs.Tn.Gov](https://www.oneDhs.tn.gov). Dooro "Gelitaanka Racfaanka ee Onlayn" ("Access Appeal Online") si aad u xarayso racfaan.
2. Dhanka Taleefanka: Wac (866) 787-8209 ama 1-800-270-1349 (TTY)
3. Cinwaanka Boostada: Foormka racfaanka ku dir James K. Polk Building 505 Deaderick Street, 1st Floor ATTN: Clerk's Office P.O. Box 198996 Nashville, TN 37219-8996,
4. Fakis: Foormka racfaanka ku soo dir fakiskan (615) 248-7013 ama (866) 355-6136.

Foormka racfaanka waxaa laga soo degsan karaa bogga TDHS ga ee [Tn.Gov/HumanServices/Information-And-Resources/Dhs-Forms-And-Applications.html](https://www.tn.gov/human-services/information-and-resources/dhs-forms-and-applications.html)

Ma xiiseyneysaa Wareegga 2aad ee P-EBT ga bisha (Luulyo ilaa Sebteembar 2020)

Si loo hubiyo in dhammaan carruurta xaqa u leh ay helaan manfacaha nafaqeynta, TDHS waxa ay kordhinaysaa muddada racfaanka la qaadan karo ee waalidiinta aaminsan in ilmahoodu u qalmo Wareegga 2aad ee P-EBT ga. Manfacyada Wareegga 2 ee P-EBT waxaa loo diray guryaha ay degan yihiin carruurtii u qalantay bishii Oktoobar 2020. Haddii aad aaminsan tahay in ilmahaaga uu u qalmo Wareegga 2aad ee P-EBT ga, laakiin aaddan helin kaarka P-EBT ga, weli waxaa dhici karta in aad awoodo in aad tallaabo qaado oo aad racfaan soo dirsado. Caruurtu ayaa u qalmaya manfacyada P-EBT ga ee Wareegga 2aad haddii:

- Ubadka waa aanu dhigan fasalka la xaadiro ee waji-ka-wajiga ah ugu yaraan 5 maalmood oo xiriir ah.
- Ubadka wuxuu xaq u yeeshay in dugsiga laga siiyo cunto bilaash ah ama qiimaheedu la dhimay, ama wuxuu dhiganayay dugsiga Qodobka U-qalmitaanka Bulshada.



**Sida loo Xareeyo Racfaanka waegga 2aad ee P-EBT ga
Waalidiinta aan soo gudbin racfaanka wakhtiga waegga 2aa (Julaay, Ogosto
iyo/ama Sebtembar 2022)** oo aanna rumaystaan in ilmahoodu u qalmo, laakiin aanu helin
manfacyada, waxay xerayn karaan racfaan mid ka mid ah siyaabahan soo socda:

1. Qaab online ee Mid ka mid ah Barta Macmiilka ee DHS ee <https://OneDhs.Tn.gov>. Dooro "Gelitaanka Racfaanka onlayn" ("Access Appeal Online") si aad u xarayso racfaan
2. Dhanka Taleefanka: (866) 787-8209 ama 1-800-270-1349 (TTY)
3. Cinwaanka Boostada: Foormka racfaanka ku dir James K. Polk Building 505 Deaderick Street, 1st Floor ATTN: Clerk's Office P.O. Box 198996 Nashville, TN 37219-8996, ama qaab
4. Fakis: foomka rafcaanka ku soo dir fakiska (615) 248-7013 ama (866) 355-6136.

Foormka racfaanka waxaa laga soo degsan karaa bogga TDHS ga ee
Tn.Gov/HumanServices/Information-And-Resources/Dhs-Forms-And-Applications.html



Racfaan ka Qaadashada P-EBT ga ee Wareegga 1aad (Maarso 2020- Maajo 2020)

Si loo hubiyo in dhammaan carruurta xaqa u leh ay helaan manfacyada nafaqada, TDHS waxa ay kordhinaysaa muddada racfaanka ee waalidiinta aaminsan in ilmahoodu u qalmo Wareegga 1aad ee P-EBT ga. Waalidiintan ayaa weli dhici karta inay awoodaan inay wax ka qabtaan iyagoo racfaan soo xaraysta. Caruurta ayaa u qalmayay P-EBT ga ee Wareegga 1aad haddii:

- Iskuulkoodii oo la xiray cudurka karoonaafayrus darteed (COVID 19); iyo
- Ubadka ayaa xaq u la'haa inuu iskuulka ka helo cunto bilaash ah ama qiimaheedu la dhimay

Sida loo xareeysto racfaanka waegga 1aad ee P-EBT ga

Waalidiinta yaa **racfaan aan soo dirsan inta lagu jiray muddan loogu talagalay ee bisha (Maarso 2020-Maajo 2020)** oo rumaysan in ilmahoodu u qalmayay, laakiin aan helin manfacana, waxay soo gudbin karaan iyagoo soo maraya mid ka mid ah siyaabaha soo socda:

1. Qaab online ee Mid ka mid ah Barta Macmiilka ee DHS ee <https://OneDhs.Tn.gov>. Dooro "Gelitaanka Racfaanka onlayn" ("Access Appeal Online") si aad u xarayso racfaan
2. Dhanka Taleefanka: (866) 787-8209 ama 1-800-270-1349 (TTY);
3. Cinwaanka Boostada: Foomka racfaanka ku dir James K. Polk Building 505 Deaderick Street, 1st Floor ATTN: Clerk's Office P.O. Box 198996 Nashville, TN 37219-8996, ama qaab
4. Fakis: Foomka racfaanka ku soo dir fakiskan (615) 248-7013 ama (866) 355-6136.

Foomka racfaanka waxaa laga soo degsan karaa bogga TDHS ga ee Tn.Gov/HumanServices/Information-And-Resources/Dhs-Forms-And-Applications.html